


# Ogow xeerarka

Queensland waxay leedahay xeerar kireysi laga yaabo inay ka duwan tahay meelihii kale ee aad ku noolayd.

Waxaad leedahay **xuquuq** iyo mas'uuliyado ku saaran markaad guri kireysaneyso. Ogow waxay yihiin oo ka fogow dhibaatooyinka.

## RTA ayaa u diyaar ah caawin

Awoodda Kireysiga Guryaha  (RTA) ayaa ah hay'ad dowladeed oo indhaha ku haysa sharciyada kireysiga gudaha Queensland. Waxaan siinnaa caawimo iyo macluumaad kireystayaasha, kireeyeyaasha iyo wakiillada hantida ma-guurto.

## Dhibaatooyinka marka la kireysanayo

Haddii aad adiga iyo kireeyahagu aad ku heshiin weydaan sidii loo xallin lahaa dhibaato, annaga ayaa halkan u joogna sidii xal loo heli lahaa.

RTA ayaa bixisa adeegga xallinta qilaafka oo lacag la'aan ah.

Nooga soo wac 1300 366 311 si aad u ogaato  sida aan gacanta ga geysan karno.

## Hel macluumaad kireysi intaa ka badan

Booqo degelkayga **rta.qld.gov.au** sidii aad u lahayd macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan kireysiga gudaha Queensland.

Nooga soo wac **1300 366 311**. Uga hel jawaabo su'aalahaaga kireysi. Waxaan furanahay Isniinta ilaa Jimcah laga bilaabo 8.30am illaa 5pm.

## Ku hadal luqaddaada

Interpreter Adeegga Tarjumaadda iyo Afcelinta (TIS) ayaa lagu bixiyaa lacag la'aan iyada oo loo maro RTA. Annaga na weydiiso caawimada tarjumaanka markaad na soo wacdo, ama ugu garaac TIS si too ah 131 450.

Macluumaadkan waxa loogu talagaly kaliya inay noqoto hagitaan guud. Ma aha kala talin sharci. RTA ayaan kaaga ballan qaadi doonin sax ahaanta iyo dhammaystirnaanta macluumaadka la bixiyay. Si aad u hesho macluumaad intaa dheer  tixraac Xeerka Guryaha La Kireysto  iyo Qolalka Waafajinta leh ee 2008 *(Residential Tenancies and Rooming Accommodation Act 2008).*

residential tenancies authority

## Xeerarka guud ee kireysiga qaarkood.

### Kiraysteyaasha:

- Ku bixi lacagta kirada waqtiga loogu tala galay.
- Ugu jir meesha nadiif, nidaam iyo bubur-la'aan
- Oofi shuruudaha la isku ogyahay ee heshiiska kireysiga.
- Ixtiraam xaqa ay u leeyihiin deriskaagu deggenaanta iyo qaylo-la'aanta

### Guri kireeyeyaasha:

- Ixtiraam asturnaanta kireystaha oo raac shuruudaha u dhigan soo galitaanka.
- U samee wax hagaajinta iyo dayactirka
- U hoggaansan sharciyada caafimaadka iyo badbaadada
- Dammaanad u qaado RTA-ga

Iskaan garee koodhka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

CC BY

Somali

creating pathways